

1. Magaca i skuulka

Pikku Huopalahden ala-asteen koulu

2. Ujeedada ku dhaqanka xeerarka iskuulka

Xeerarka habsocodku waxay kor u qaadaan nidaamka gudaha ee iskuulka. waxbarasho aan caqabad lahayn iyo amniga iskuulka oo wanaagsan waxay khuseeyaan marka ardaygu joogo iskuulka ama ka qaybqaato hawlaha iskuulka dibadiisa ah. Xeerararku waa in la raaca tusaale ahaan inta lagu guda jiro waxbarashada iyo dalxiisyada.

3. Xuquuda iyo waajibaadka ardayga

Ardaydu waxay xaq u leeyihiin in loola dhaqmo si siman oo loo wada siman yahay iyo jawi waxbarasho oo ammaan ah. Ardayda ka duwan ardayda kale waxay wada leeyihiin xuquuq wada siman. Kor u qaadida is fahanka dhaqamada iyo jinsiyadaha kala duwan ee mujtamaca iskuulka.

Iskuulkeenu wuxuu leeyahay barnaamij fiican oo ka hortaga caayda iyo is dhibaataaynta. Ardaygu waxaa waajib ku ah inuu ka qeybqaato waxbarashada ilaa uu ka dhameeyo. Ardayga waxaa waajib ku ah inuu u guto xiisadihiisa iyo homeworkiisa si wanaagsan. Ardaygu waxaa waajib ku ah in uu ka qeybqaato waxbarashada, illaa aan la siinin fasax uu ku maqanaado.

2. Nabadgalygo iyo habka waxbarashada oo aan hor istaag lahayn

Dhaqan wanaagsan

1. Waxaan xushmeynayaa ardayda, macalimiinta iyo shaqaalaha iskuulka.
2. Waxaan u dhaqmaa oo u hadlaa si xushmad leh.
3. Waxaan kor u qaadayaa nabadda waxbarashada.
4. Waxaan la dagaalayamaa caayda, iyo is dhibaataaynta.
5. Waxaan raacayaa tilmaamaha wanaagsan.
6. Waxaan raacayaa caadooyinka habka cunidda wanaagsan.
7. Waxaan raacayaa jadwalka iskuulka.

Dhaqdhaqaaqa iyo joogitaanka

1. Waxaan u soconayaa xiliga bareega iyo gudaha iskuulka si degan.
2. Waxaan ku qaadanaaya bareega daarada iskuulka.
3. Waxaan si dagan ugu soconayaa iskuulka gudahiisa iyo banaankiisaba.
4. Waxaan raacayaa jidka toosan ee iskuulka lagu tago/ aado.
5. Marka uu iskuulka dhamaado, waxaan ka soo baxayaa aagga iskuulka aniga oo u maraya albaabada dhinaca barxadda.
6. Waxaan u dhaqmaa si macquul ah oo wanaagsan marka aan iskuulka u socdo.
7. Waxaan ku tegi iskuulka baaskiil. Waxaan xiran koofiyada baaskiilka, baaskiilkana waxaan ku xeri meesha loogu talagalay.

Nadaafadda iyo daryeelka deegaanka

1. Waan ilaalinayaa alaabta iskuulka, waxaana mas'ul ka ahay qalabka /alaabta waxbarashada ee iskuulka laga bixiyo.
2. Waxaan mas'ul ka ahay alaabtayda iyo dharkayga magac ayaan ku dhajinayaa. Iskuulka ma bixinaayo qarashka alaabtayda hadii ay jabaan ama dharkayga haddii ay dhumaan.
3. Waan ixtiraamayaa alaabta qof kale leeyahay.
4. Wax qashin ah makeenayo iskuulka.
5. Waan nadiifinayaa wixii aan haleeyo.
6. Waxaa waajib igu in aan kabo wixii aan haleeyo.
7. Waxaan u sheegi doonaa wixii la xariira cilladda amniga shaqaalaha iskuulka.

Isticmaalka computerada, taleefannada gacanta iyo aaladaha kale ee la isticmaalo.

1. Waxaan isticmaalayaa dhammaan ICT –ga/ iyo aaladaha mobilada ee iskuulka sida ku cad tilmaamaha macallinka.
2. Ardaydu waa in aysan isticmaalin mobilka inta lagu guda jiro waqtiga iskuulka. Inta lagu jiro casharrada iyo hawlaha kale ee caadiga ah, aaladda moobilka waa in la isticmaalin.
3. Shqada ardayga ma koobiyayn karo qoraalada ama ma qaadi karo sawirro fasax la'aan mana u diri karo meelo kale.
4. Sawir ama video laga qaaday qof kale lama dhigi karo internetka, baraha bulshada iyo meel kasta oo dadweyne ah iyagoon fasax laga haysan. Qof kale lagama faafin karo macluumaad dhibaataayn karo.

Maandooriyaha iyo walxaha halista ah

Lama keeni karo waqtiga iskuulka dareerayaasha iyo waxkastoo halis ah oo dadka dhibaato u geysan kara waa ka mamnuuc in la keeno tuusaale ahaan maandooriyaasha iyo wax yaabaha sakiinta ah.

5. La socodka iyo dib u eegista xeerarka nidaamka

Xeerarka nidaamka ee iskuulka ayaa waxaa isla eegi doonaan shaqaalaha iyo ardayga bilowga sannad dugsiyeedka, markaas waxaa la qiimeyn doonaa i xeerarka kala dambeynta loo baahan yahay in la cusbooneysiyo iyo in kale. Xeerarka nimaadka iskuulka ayaa loo dirayaa guryaha ardayda bilowga sanad dugsiyeedka si ay u helaan macluumaadka nidaamka iskuulka. Xeerarka ayaa dib loo eegaa mar kasta oo arday ama shaqaale cusub iskuulka.